

BUUG 3

Buugga Makiinadda-Farta Somaliga

ee

loogu talagalay ardayda dhammeysay barashada furayaasha makiinadda

- Buug 1 - Barashada hoose ee makiinadda furayaasha Ingirisida ah
- Buug 2 - Barashada hoose ee makiinadda furayaasha Talyaniga ah

Waxaana soo ururiyey
barayaasha
Lanta Tababarka Karraaniyiinta
ee

INSTITUUTKA MAAMULKA HAWLAHA GUUD

PJ
2534
.112
BBI
1944

Meeris:	Bog:		
	1	...	ARAR
1 ilaa 8	2 ilaa 9	...	Garaacis waxyaalo laga soo guuriyey warsidayaasha, buugaag, khudbado iwm.
9	10	...	XAASHI QORIS
"	11 ilaa 15	...	Tusaalooyin ah sida xaashiyaha dawladda loo garnaaco.
10	16	...	QORAALKA XAASHIDA XUSUUSTA
"	17	...	Tusaalooyin ku saabsan xaashida xusuusta ee dawlada
11	18	...	XARFAHA AF SOMALIGA OO GACANTA KU QORAN
"	19 ilaa 24	...	Garaacista diyaarinta gacan ku qoran
12	25	...	KOOK TIRO
"	26 ilaa 31	...	Garaacista khudbooyinka statistikada ee ku saabsan wargelinta dawladda
13	32	...	GARAACISTA ISTENSALLADA IYO BADINTOODA
"	33	...	Gal warbixin oo istensal lagu garaacay
-	34 ilaa 40	...	LAYLI SUGAN (oo waqti loo qabtay)

vll

- 1 -

GARAACISTA HEERKA DHEXE

Buuga kowaad, derejada hoose ee makiinad garaaca af Somaliga ah, waxaad ku soo baratay furayaasha makiinadda. Waxaa dhici Karta in aad gaybta kowaad ku soo baratay furayaasha Ingirisida ah. Ama aad gaybta labaad ku baratay furayaasha Talyaniga ah. (Fiiri hoos sawirka 1, ama 2).

Haddi aad hadda wax sax ah garaacikarto, addon eegin furayaasha, waxaad diyaar u tahay in aad u gudubto gaybta dhexe ee baugan, si aad u barato sida loo garaaco:

Waraaqaha u kala socda xafiiska dhexdiisa,
Wasaaradaha, ama wixii ogeysiin ah.
Waraaqaha dowlada ama kuwa ganacsiga.
Koox tiro ama aqoonta tirada.
Xaashida qordal badinta iyo war-bixinta.

Xusuusnow, haddi aad ku degdeqto garaacista, oo markaas gefafkaagu battan, xafiiskaa waxba uguma filid. Madaxdaadu saxiiximayso warqad isku qasan, qaabdarran oo gefaf badan leh. Waxa u dhannta isagoo u dhiibta qof la gaabinaya get la'aanna garaacaya. Haddaba, himiladaadu ha ahaato gef la'aan iyo hofnaan degdegsiinyo horteed.

furayaasha
Ingirisida



furayaasha
Talyaniga



MEERIS 1

Hadday makiinaddadu tahay ta WEYN, hareeraha waxaad ku xidhaa
10 (60 bannaan) 70

Hadday makiinaddadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xidhaa
20 (60 bannaan) 80

Garaac waxa soo socda saderkiiba saddex goor:

kow, laba, saddex, afar, shan, lix, toddoba, siddeed, sagaal,

1 2 3 4 5 6 7 8 9

toban, kow iyo toban, laba iyo toban, saddex iyo toban, afar iyo toban, shan iyo toban, lix iyo toban, toddoba iyo toban, siddeed iyo toban, sagaal iyo toban,

10 11 12 13 14 15 16 17 18 19

labaatan, kow iyo labaatan, laba iyo labaatan, saddex iyo labaatan, afar iyo labaatan, shan iyo labaatan, lix iyo labaatan, toddoba iyo labaatan, siddeed iyo labaatan, sagaal iyo labaatan,

20 21 22 23 24 25 26 27 28 29

soddon, afartan, konton, lixdan, toddobaatan, siddeetan, sagaashan,

30 40 50 60 70 80 90

boqol, laba boqol, saddex boqol, afar boqol, shan boqol, lix boqol, toddoba boqol, siddeed boqol, sagaal boqol, kun,

100 200 300 400 500 600 700 800 900 1,000

Saddex goor garaac weero welba

Toddobaadka waxa ku jira toddoba maalmood. Waxayna yihiin Jimce, Sabti, Axad, Isnin, Talado, Arbaca, Khamis.

Sannadka waxa ku jira laba iyo toban bilood. Waxayna yihiin Jannayo, Febrayo, Marso, Abril, Majo, Jun, Lulyo, Agosto, Sebtember, Okotobar, Nofembar, Disembar.

Dalalka Afrika ee madaxa bannaan kuna jira Ururka Midoowga Afrika:

Somaliya, Najeriya, Gana, Layberiya, Sinigal, Kiniya, Yugandha, Itobia, Tansaniya, Malawi, Sodan, Masar, Libiya, Jad, Jamhuriyadda Afrikada Dhexe, Sair, Maroko, Mali, Layberiya, Togo, Dahumi, Sambiya, Aljeriya, Tunisiya, Muritaniya, Jamhuriyadda Dadka ee Kongo, Ikwatoriyal Gini, Kamarun, Ruwanda, Burundi, Nayjar, Gambiya, Ayfery Kost, Sira Liyon, Botsuwana, Giniya, Abar Folta, Lesoso, Swasiland, Jamhuriyadda Malgasi.

Wasaaradda Dibedda ayaa ku shaqaleh arrimaha Ururka Midoowga Afrika.

MEERIS 2

Hadday makiinaddadu tahay ta WEYN, hareeraha waxaad ku xidhaa
 10 (60 bannaan)..... 70

Hadday makiinaddadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xidhaa
 20 (60 bannaan) 80

Garaac weeroyinka soo socda oo ku saabsan midabada

- Calankeenu waa buluug.
- Xiddigta Calankeenu waa caddaan.
- Dhiigga dadku waa casaan (guduud).
- Caleenta geedku waa cagaar.
- Dhuxushu waa madow.
- Gabadhaa midabkeedu waa maariin.

Ma u fiirsatay waxaad garaacaysey? Hadday sidaa tahay, garaac su'aalaha iyo jawaabaha soo socda oo ku buuxi meelaha bannaan eray sax ah.

- Midabka Calankeenu waa sidee?
- Calankeenu midabkiisu waa
- Xiddigta Calankeenna midabkeedu waa sidee?
- Xiddigta Calankeenna midabkeedu waa
- Diigga dadka midabkiisu waa sidee?
- Diigga dadka midabkiisu waa
- Caleenta geedka midabkeedu wa sidee?
- Caleenta geedka midabkeedu waa.....
- Dhuxusha midabkeedu waa sidee?
- Dhuxusha midabkeedu waa
- Gabadhaa midabkeedu waa sidee?
- Gabadhaa midabkeedu waa

Garaac saddex goor hadalkan laga soo guuriyey Tusaalooyinkii Madaxweynaha :

Kacaanka Somaliya wuxuu ku dadaalay inuu ka sameeyo beddello badan muddo ka yar saddex sannadood, dhinacaasna waa kaga geddisan nahay kacaannada kale. Xukuumadda Kacaanku waxay daynankii gudaha oo lagu lahaa oo dhan bixisay, iyadoo dhulkiinana horay u marisay.

(Jaale Siyad wuxuu hadalkaa yiri bishii Agosto 1972)

MISGRIS 3

Hadday makiinaddaadu tahay ta WEYN, hareeraha waxaad ku xidhaa
 10(60 bannaan)70

Hadday makiinaddaadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xidhaa
 20 (60 bannaan) 80

Garaac saddex goor magacyada wasaaradaha ee soo socda:

Xeerwada
in saad huf
bannaan
xaraya
ku fayo
mari kaad
garaacayso
1 Paq 9

- 1. WASAARADDA BEERAHA
2. WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSINTA
3. WASAARADDA XOOLAHA
4. WASAARADDA DIBEDDA
5. WASAARADDA SEECADA
6. WASAARADDA DHISMAHA GUUD
7. WASAARADDA GAADIIDKA
8. WASAARADDA GAASHAANDHIGGA
- ✓ 9. WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA
10. WASAARADDA GANACSIGA
11. WASAARADDA GUDAHA
12. WASAARADDA CAAFIMAADKA
13. WASAARADDA CAYAARAHA IYO SHAQAALAHA
14. WASAARADDA QORSHAHA IYO MIDAYNTA
15. WASAARADDA LACAGTA
16. WASAARADDA MACDANTA IYO BIYAHA
17. WASAARADDA WAXBARASHADA
18. WASAARADDA WARARKA IYO HANUUNINTA DADWEYNAHA

Garaac saddex goor hadalkan laga soo guuriyey Tusaalooyinkii Madaxweynaha:

5 Bannaan
gudaha
gudaha

- Maanta Afrika waxay u socotaa sidii ay u midayn lahayd danteeda, iyo sidii ay u qaadi lahayd tallaabooyin mid ahaansho say uga, nabad gelin lahayd nafteda gardarra kasta sidaa awgeed Somaliya waxay ku dadalaysaa weligeed ama halla kaashato Ururka Midowga Afrika, amase dawlada kale oo Afrikanka ah.
- Sidii loo heli lahaa sidii wax looga qaban lahaa weerarrada gardarrada ah oo ay ku soo qaadeen gumeystayaashu.
- Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu canbaareynayaa gumeysiga iyo midab-kalasooco, iyo fragelinta arrimaha gudaha ee dawlada kale.
- Wuxuuna rumeysan yahay in lagu dhammeeyo dhibaha si nabad gelya ah, Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu ayidayaa ummadaha midoobay iyo xeerkooda iyo Ururka Midowga Afrika. Weliba wixii ku sii saabsan si nabad gelya ah.

(Jaalle Siyad 21, Oktoobar 1969
 Markuu canbaareeynaayay
 Gumeysiga).

MEERIS 4

Hadday makiinaddaadu tahay ta WEYN, hareeraha waxaa ku xidhaa
 10 (60 bannaan) 70

Hadday makiinaddaadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xidhaa
 20 (60 bannaan) 80

Maacallinka Ku (.....16.....) (.....24.....) (.....18.....)
tusnaya sida
barbarka wax
Poogi goro →

WASAARADDA GAASHAANDHIGGA
IYO BOOLISKA

Derejooyin Sare

Gaashaan Cadde, Gaashaanle Gaas, Gaashaanle Guuto,
 Abbaanduule.

Saraakiil Sare

Gaashaanle Sare, Gaashaan Midle, Gaashaanle.

Saraakiil Hoose

Dhamme, Laba Xiddigle, Xiddigle.

Saraakiil Xigeen

Saddexle, Labaale, Midle, Saddex Alifle, Laba Alifle.

Askar

Alifle, Dable.

Amar walba
saddex
gore garaac
sida →

Urur! Urur! Urur!

Isjir!

Digtoonow!

Safka-Fural!

Safka-Midig eeg!

Hor Eeg!

Nasta!

Debcil!

Tallabo Horusoco!

Tallabo Dib-soco!

Midig-Soco

Bidix-Soco!

Safka-Kiral!

Horu-Soco!

Joogso!

Darandorri!

Safka Midig ama Bidix raac!

Salaan Midig ama Bidix!

Salaan Be'del!

Meeris 5

Ma dooneysaa inaad nogoto gof wax u qora wargeeska Xiddigta
Oktoobar ragga cayaaraha?.

Garaac warbixintan ku saabsan kubbadda cagta uuna qoray
"Saciid Sonna".

(20)

(80)

Weerarka Munishibiyo waa
seef aan af lahayn

Munishibiyo iyo Fiyat qolaba dhibic bay la boodeen markii ay 0-0 ku caaridey ciyaar kubbadda cagta ah ay foodda isku gashadeen dorraad.

Ciyaartaa oo ku tirsanayd halganka kooxaha waaweyn ee ururka kubbadda cagta ee Somaliya waxa la filaayey inay Munishibiyo badiso, hase ahaatee seefaan af lahayn bay noqdeen.

Inkastoo Fiyat la soo baxday tabar intii lagu tirinayey ka weyn ay, mujeen ciyaar hannaankeedu uu si fiican isugu dubbaridan yahay, dadweynihii dheesha daawaneeyey waxay dhammaan isku raaceen in Munishibiyo weerarkoodu intii dorraad ka ilka badnaan lahaa haddii Binshakir oo gaashaandhiga dib loogu riixay hujuun-hore laga dhigi lahaa.

Binshakir, sida xaqiida ah, waa ninka u soo dhisa ciyaarta weeraryahannada kale ay ka mid yihiin Axmed "Saqir" iyo "Kuluu" oo ayaga shaqadoodu ay tahay inay kubbadda shabaga ku malaasaan.

Munishibiyo gefkay dorraad sameysey waxa u weynaa, una sabab ah waxa intii ay ciyaarti ku dhammaatay, Binshakir oo difaacooda isyirashadeen ku xoojiya. Waxa mid jirta in gaashaandhigga Munishibiyo uu yahay mid dhib yar aan ku liica, hase ahaatee, Binshakir la'aantisna weerarkoodii baa u ekaaday seefaan af lahayn.

Weerarka Munishibiyo inkastuu intii loo maleynayey ka dhirranaan yaraa, haddana goolka Fiyat mar iyo laba ka badneyd inta jeer uu halis ku fakadey. Daqiiqaddii 65naad Axmed "Saqir" ayaa intuu laba qof kala dhex baxay laad madfaca goolka in mitir ka yar u marsiyeey.

Hadday makiinaddadu tahay ta WEYN, hareeraha waxaad ku xidhaa
10 (60 bannaan) 70

Hadday makiinaddadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xidhaa
20 (60 bannaan) 80
← 21 → ← 18 → ← 21 →

WASAARADDA BEERAHA

Waxa Beeraha Somaliya ka baxa:

Cagcagaar

Cagcagaarka Somaliya ka baxaa waxay yihiin:
Bataato Macaan (Sonkor Qandi), Moxoggo, Isbinaash, Sallbuuko,
Yaanyo, Filfil, Baamiye, Basal, Digir.

Caws

Somaliya cawsiga ka baxa waxa ka mid ah:
Galley, Mesego, Sisin, Sarror (Camadi), Bariid (Bariis).

Miro

Miraha Somaliya ka baxaa waxay yihiin:
Qare (Xabxab), Cananaas, Qumbe, Muus (Moos), Arranjo, Liimo,
Ugunji (Liin macaan), Cambo (Cambe), Babbay, Gawaf (Gaafe),
Rumaan, Seytuun.

Wax yaale kale oo la beero

Gudbi, Gabbal Doge, Lows, Xig (Xaskul).

Cayayaanka laga yaabo in ay beerta waxyeello u gaystaan

Suus (Afdhere, Laaniye), Aboor, Kabajaa (Kobajaa, Haraati-
geele), Ayax, Jirriqaa (Warriiq), Quraanyo, Xoon (Laxle),
Madoobiso, Cashaaqurun, Ayeeyo-lugdheer (Abooto-idabadis),
Koronkorre, Diqsi-cadde, Dheertaxanyo, Hangaraarac.

Nagii hore intii Kacaanku dalkeenna uusan ka curan
kol ay ku tahay waxyaalaha aynu hodanka ku nahay, sida
gellaayda iyo badarka, waxaan u baryo tegi jirnay. Nasiib
wanaagsan, maanta waxaa muqata in taas laga baxay oo dadkii
Somaliyeed muujiyeen inay karta u leeyihiin inay khayraadka
dalkooda ku jira la soo baxaan.

(Dadalkan waxa laga soo guuriyey Xiddigta
Octobar, 31kii Jannayo 1973).

MEERIS 7

Macallinkaaga ku tuaj doona sida 5 bannaan hore loo galo oo xiro furaha koox-xiraha in ah 25 (makinadda yar) ama 15 (makiinadda weyn

Markaa riix furaha xagga midigta ka xiga furaha koox-xiraha si aad u hesho halka laga bilaabaayo

Alaab Xafiis

Karaaniga makiinadda waxa xafiiskiisu u baahan yahay
guri bii qalab iyo alaabtan - hoos ku qoran:-

Miis iyo kursi

Makiinad

Gal asture

Telifoon

Buugga telifoonka

Armaajada alaabta xafiiska

Makiinad qodobto ah

Bir xaashida daloolaha si warqado galka u gasho

Buuga-xasuusta, laabis, qalir, iyo tirtiro

Saxan iyo wax waraaqaha markaa faraaha lagu hayo kor laga saaro si ann dabayshu u qaadin markay dhacayso dabaysha jilal

Wax uu miiskiisa ku tirtiro si uu had iyo goor nadiif u ahaado.

Qallac-xaashi

Xaashiyo korka lagaga daabacay magaca iyo rugta wasaaradda ama laanta leh.

Xaashiyo fudud, waraaqo iyo kaarboon

Galal xirmo

Qalabkan iyo alaabtan qiimahoodu waa fara badan yahay. Shaqaalaha Dawladu, sii ba karaaniga makiinaddu waa inu u foojiknaadaa wixii alaab iyo qalab ah oo xilkoodu saaran yahay.

Wax alla wixii xafiiska lagaga shaqaynaayo Dawlada lacag badan bay ku joogaan. Qofka karaaniga ah ee markuu wax garaacaayo gefkiisu fara badan yahay, had iyo goorna waraaqaha ka buuxiya kolayga qashinka, wuxuu luminayaa lacagtii Dawlada.

Qun yar garaac gefkana iska ilaali. La dheerayntu ha kuu dambayso.

MEERIS 8

Fanku waa maxay?

Fannaankuse waa maxay?

5 fannaan
more ugal
in kooxda
2-ku xool

→ Fanku waa waxa dadka daaha uga qaada si qoto dheer leh, qof waliba wuxuu tabanaayey si uu u yiraahdana ku adkayd, jacayl, guubaabo talo, dhaqan iwm. Waa waxa u qiimo weyn oo dhaqaajin kara qofka dhiiggiisa iyo maskaxdiisa si dhaqsa leh oo fudud. Fannaanku sida adduunka looga yaqaanno waa qof la haybeeyo oo la jecel yahay innaguna adduun kaan ka mid nahay. Waxaa iswaydiin leh maxaa loo jeclaaday? Jawaabtu waxay tahay fannaanku waa hanuuniyaha dadka, waa ka waddanninimo ku beera dadka ee guubaabiya had iyo jeer u tilmaama waxa loo baahan yahay, xusuusiya dhaqankooda si aan loo illaawin. Taariikhda haddaan ku laabano markuu lahaa Cabdullahi Qarshi:

10 fannaan
more ugal
or
maxay
x-
2-ku

"HARUUB, NIN SITOO,
HASHIISA IRMAAN,
HA MAALIN LA LEEYAHAN AHAY,
HOBYADA BARI IYO,
HAWAASHTA GALBEED,
HADMAY ISU HILLIN DOONAAN,
DAGAAL NIMU HAYSTO,
MEEL HALISOO HUBKIISU,
HANGOOL YAHAN AHAY."

Way yaraayeen markaas inta ku fakareysay waddanninimo. Gobannimada intii loo halgamayey dadka kiciintiisa waxaa u weynaa fannaaniinta; heeso, gabayo, guuroow, saar iyo kuwa ay ku sheegaayeen wanaagga gobannimadayada ayey tirin jireen. Markii la xoroobay kaddib 60kii ee laga leexday ujeeddadii xornimada ee in yari ku danaysatay, ummaddiina, la iloobay lama ay hakan fannaaniintu inay durba u sheegan dadkii ina khayaamay.

"HASHAAN TOBAN SANO,
U HEESAAYAY,
HOGGAANKIYO HEERYADIIBA CUNTEE,
LIXDANKAAN HAYBIN JIREY,
MAXAA HELAY."

(Cabdullahi Qarshi)

MEERIS 9

Xaashi Qoris

Macaalinkaaga hadda si tafatiran kuugu sheegi doona:

DIYAARIN

- (1) Sida xaashida gacanta ay ugu qoraan ama u yeeriyaan saraakiisha dowladdu u xil sartay xafiisyada

GARAACIS

- (2) Karraani ahaan, sidii dabadeed xaashiyahaa si habsami ah aad ugu garaaci lahayd waraaqaha xafiiska:

Summad-Gal

Tariikh

Jeedaalinta

Ujeeddo

Salaan

Ubuuda xaashida

Saxeexo wuxuu ku kor qormaa magaca iyo derajeda qofka xaashida diraya

Waxa kale oo Macallinku uu ku tusi doonaa sida laba waraaqood oo dheeraad ah aad Kaarboonka ugu sameyn lahayd, si ay kayd ahaan xafiiska ugu haraan.

DIRID

- (3) Sida warqadda loo diro marka la saxeexo kaddib. Warqadda waxa lagu diri karaa Boostada ama dhambaal wale ayaa loo diibaa si uu meesha ay u socto u geeyo oo kana soo saxeexo diiwaankiisa xafiiska warqadda helay.

GALAYN

- (4) Sida waraaqaha Kaarboonka loo galeeyo, adoo raacaya habka galaynta ee dowladda.

Boggar kan ku xiga, waxaad kula kulmi doontaa xaashiyo xafiisyo laga soo ururiyey, ee garaac.



JAMHURIYADDA DIMOQRADIGA SOMALIYA

Kafiiska Madaxtooyada

ee

Golaha Sare ee Kacaanka

Sumad:- GSK/79/D-3294

Muqdisho,

Jannayo 7, 1973

UJEEDDO:

MADAXDA DUGSIGA MAAMULKA,
HAWLAHA XAFIISIYADA,
MUQDISHO

Waxaan ku faraxsanahay inaan idiin soo gudbiyo hambalyada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka sidii aad ugu dadaasheen BUUGGA LAGA BARTO MAKINADDA ay sameeyen Jaalle ~~Mohamud~~ M. Guure iyo Jaalle Xasan Haybe Wacays.

(G. Dhexe CABDULKAMID CALI YUSUF)

Xoghayaha G.S.K.

Bay

XAFIISKA MAAMULKA GUUD EE SHAQAALAMA DAWLADDA

Sumad L. 435

Muqdisho,
Jannayo 24, 1973.

Wasaaradaha oo Dhan, Muqdisho..

Wakaaladaha oo Dhan, Muqdisho..

Xafiisyada Hoos Yimaada Golaha Sare
ee Kacaanka, Muqdisho.

UJEEDO: WAR GAARSIIN.

Waxaan u sheegayaa Madaxda Xafiisyada Dawladda ee kor ku magacaaban oo dhan inay shaqaalahooda gaarsiiyaan in berri afarta galabnimo, bishuna ay tahay 25 laga doonayo inay tagaan gegeda dayuuraddaha ee Muqdisho. Waxay ka hor tegayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda Sa'iiri oo berri booqasho ku imanayaa dalkeena. Waxaa kaloo laga codsanayaa inay koox waliba iyagoo isga dooban ay meesha tagaan. Halkaasna waxaa lagu dhiibidoonza wixii kahortagaa lagu qurxin lahaa oo ah calamo iyo wixii la mid ah.

(Cali Xusen Gurac)
MAAMULE-GUUD.

(6/2/73)

JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Wasaarada Waxbarashada

Brot. L. 215/2/9178.

Muqdisho,
Jannayo 28, 1973.

Wasaaradaha oo dhan, Muqdisho.

Wakaaladaha oo dhan.

Gobollada oo dhan.

Degmooyinka oo dhan.

Shaqaalihinna oo dhan ka qaada intaxaan ah qoridda iyo akhriska farta bisha Jannayo shanteeda 73. Kaas oo la rabo in lagu ogaado heerka shaqaaluhu ka taagan yahay Barashada farta iyo si ay intaxaanka guud ugu diyaar noqdaan kaaso ah 21 Jannayo 1973.

Gaashaanle-Cabdirisaaq.

Xoghayaha Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta.



TALISKA CIIDANKA XABSIYADA SOMALIYEED

Muqdisho,

Sumad L. 209/G/192/73

Jannayo 22, 1973.

UJEEDDO:- Tababar Makiinadda-Farta.

Maamulaha Guud,
Inistituutka Maamulka
Hawlaha Guud
Muqdisho

Waxaan tixraacayaa warqaddayadii sumaddeedu ahayd 3473/G/192/72 taariikhdeeduna ahayd Disember 19, 1972 ee aanu 13 qof oo ciidankayaga ka mid ah idiinku soo dirray tababarka Makiinadda-Farta.

Waxaan ogaanay in 13 qof aanan uga maarmin Xafiisyada sababtoo ah inay shaqadii istaagtey. Sidaas darteed waxay nala noqotay in afarta aan magacyadooda hoos ku sheegi doono ay ka qayb galaan tababarkaas hadda socda, sagaalka kalena naloo soo celiyo.

- 1) Laba Alifle 322 Maxamed Ismacil
- 2) Dable 782 Maxamed Xasan
- 3) Dable 979 Maxamed Xasan Ducale
- 4) Dable 1057 Yusuf Axmed.

Waxaanu damacsan nahay in sagaalka aanu hadda la soo noqonay lagu kala daro tababarada imaan doona marba in.

(I.A. ISMACIL) S/G.
TALIYAHA CIIDANKA XABSIYADA



TALISKA GIIDANKA BOLISKA SOMALIYEED
Maamulka Qorshaha iyo Goobista

Lambarka brotokolka QG/V/9/72
Jawaabta galka Lambarka CTC/III/5
oo 10kii Jannayo 1973

Muqdisho,
Jannayo 19kii, 1973

UJEEDDO:- Tababar makiinad ku qoris.

OG. MAAMULHA GUUD
INISTITUUTKA MAAMULKA HAWLAHA GUUD, Muqdisho
TALIYAHA DUGSIGA SARE BOLISKA, Muqdisho
MAAMULKA GIIDANKA BOLISKA, Muqdisho

Tixraac xaashidaadii tirsigeedu ahaa CTC/III/5 ee 10kii Jannayo, 1973. Waxaan idiin soo dirnay 15 Askari oo aad u ogolaateen tababarka makiinad ku qorista, magacyadooduna waa kuwa hoos ku qoran:

1. Ask. 3959 Cabdirasaq Cabdillahi
2. " 5646 Cali Maxamed
3. " 7176 Bashir Cabdi
4. " 6048 Axmed Maxamed
5. " 4892 Cabdullahi Maxamed
6. " 5638 Maxamed Warsame
7. " 2281 Aden Shire
8. " 7021 Xusen Cusman
9. " 1291 Axmed Maxamed
10. " 6278 Aden Cali
11. " 1797 Cabdulqadir Xersi
12. " 3200 Cali Salad
13. " 6745 Axmed Macow
14. " 6197 Moxamud Cabdi
15. " 6665 Maxamed Jamac

Dugsiga Sare ee Boliska waa in uu Askartaa geeyaa Xarrunta Inistituutka Maamulka Hawlaha Guud, maalin kasta oo laga bilaabo 20ka bishan.


(Nur Xasan Xusen) L/X.
Codka Maamulha Qorshaha iyo Goobista

MEERIS 10

Xaashi Xusuuseed

Xaashida xusuustu waa war isgaadhsiin kooban oo u kala soocota laba xubnood oo dowladda ka mid ah, ama laba lamood oo ku wada yaal isla xubin deli ah.

Sidaa aawadeed waqtiga lays kagama lumiyo salaam, derajasheeg iyo nabad gelyeyn - waayo xaashida waxa la isticmaalaa marka qof shaqaale dowladda ihi qof kale oo shaqaale ah uu war yar ugu sheegaayo si karti iyo degdeg leh. Warqadaha lagu qoro xusuustan oo kale waa qaar ka raqiisan kuwa ururada debadda loo diro. Warqadaha dowladda ayaa u soo dhigta sida tan hoos ku taal si ay wasaaradaha oo dhami u isticmaalaan:



JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Moqdisho 1973

Ka timid:

Lambarka borotokoolka:

Jawaabta galka lambarka:

oo

UJEEDDO:

Ku soocotaa:

.....

(warku halkanuu ku garaacmayaa)

(sexeexa qofka diraya)

Wasaaradda direysa xaashidu magaceeda halkaney ku qortaa.

Bogga kale waxa ku yaal xaashi aan run ahayn oo Wasaaradda Caafimaadku ay u direyso Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Guryaha.

Macallinkaaga ayaa ku siin doona xaashi xusuuseed oo daabacan si aad u garaacdo sidii adoo karraani ka ah Wasaaradda Caafimaadka.



JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Muqdisho, 5tii Febraayo, 1973

Ka timid: WASAARADDA CAAFIIMAADKA

Lambarke Borotokcolka: WC/46/105

Jawaabta galka lambarka: 723/MAK

oo: 29kii Jannayo, 1973

UJEEDDO: Makiinado Hagaajin

Ku socotaa: Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Guryaha

Wasaaraddani waxay haysataa 22 oo makiinadaha-farta ah oo 2 ay koronta yihiin. Saaka subixii waa taan telifoon kuu soo diray, ee aan ku weydiistey inaad noo soo dirto 2 makaanik oo makiinadaha nadiifiya oo saliideeya, wixii jabanna hagaajiya.

Hawsha marlaad dhameysaan, waxaad noo soo dirtaan inta samayntoodu ku kacaysó. Waxaan filayaa inay tahay 10 shilin makiinaddiiba.

Shaqadii wasaaradda oo istaagtey makiinad la'aan darteed, waxaanu jeclaan lahayn inaad degdeg noogu dhamaysaan.

Cusman Axmed Xasan

Maamule-Guud

MEERIS 11

Inta badan, karraaniga makiinaddu wuxuu garaacaa wuxuu gacanta ku qabsay qofka u madax ahi. Ma akhri kareeysee wax gacanta ku qoran? Baro sida loo qoro:-

	<u>HIGGAADA SOMALIDA</u>		B, b	B b
T, t	T t	J, j	J j	
X, x	X x	KH, Kh, kh	KH, Kh, kh	
D, d	D d	R, r	R r, r,	
S, s	S s	SH, Sh, sh	SH, Sh sh	
DH, Dh, dh	DH, Dh, dh	G, g	G, g,	
G, g	G g	F, f	F f	
Q, q	Q q	K, k	K k	
L, l	L l	M, m	M m	
N, n	N n	W, w	W w	
H, h	H h	Y, y	Y y	
A, a	A A a	AA, Aa, aa	AA, Aa, aa	
E, e	E e	EE, Ee, ee	EE, Ee, ee	
I, i	I i	II, Ii, ii	II, Ii, ii,	
O, o	O o	OO, Oo, oo	OO, Oo, oo,	
U, u	U u	UU, Uu, uu	UU, Uu, uu,	

Adoo sadarrada laba bannaan u dhexaysiinaya, garaac hadalkan laga soo guuriyey BUUGA SAYNISKA ee ay dhigeen GUDDIGA AFKA SOMALIDA

Geedaha Ca beerto iyo Kuwa
dibad-ka-baxa ah

Haddii aad u fiirsato geedaha aad tagaarsato ama aad badiba aragto, waxa ku muuqanaysa inaad u kala gaybin karto kuwa ca beerto iyo kuwa dibad-ka-bax ah. Geedaha ca beerto waxa ka mid ah Masaggeda, Galleyda, Sisinta, Luwska, Mooska, Babbayga, Cambaha, Saytuuska, Sankorka, Timirta, Qaam-Qaamuddida iyo kuwa kale. Geedaha dibad-ka-bax ah waxa ka mid ah Galoolko, Quraca, Maraaga, Soqsoqta, Dharkayaha, Hoolaha, Jiica Kidiga, Jicibta, Gobka, Dacanta, Xigga, iyo kuwa kale.

Badiba, Geedaha ca beerta waxa kuwa cunto laga helo. Geedaha ca beerto waxay ka siman yihiin nafleyda dabjoogta ah ee ca dhagda. Berigii hore nafleyda oo dhama waxay ~~ahay~~ ahaayeen duurjoog, geedahoo dhama dibad-ka-bax.

Adoo sadarrada laba bannaan u dhexaysiinaya, garaac hadalkan
laga soo gurriyey XIDDIGTA OKTOBAR, 31kii Jannayo 1973.


Horikaca Dal Kasta

Waa Daduuka Dadkiisa.

Siyasadda Hantiwadnagga ee dalkeenna loo dooraydirba horikac weyn, bar dhinnac kasta laga gaaray dadkeenna oo ku kulsanaaday awoodiisa, taasina dhallisay in iskna wax u gabsa lagu dhiso dugsiyo badan, cusbitaalko tiro badan, wershedo iwm. Siyaasadda Hantiwadnagga ahi waxay kaloo kor u gaaday waxgaradki. **Siyasadda** ee 7of Kasta oo Somaliyeed, si uu ku gaarto wixii dan ugu jirto iyo waajibadka kala qudboon dhismaha waddankiisa. Inwaddu intay jirtay waxaa kaloo kor u kacay magacii Jarankcena, taasina ugu waacan tahay Siyaasadda dibadeed ee dalkeenna oo noqotay mid u hoiseedaysa midnimada Somaliyeed, mid si cad u la dagaallameysa ~~mid~~ gumeysiga cusub iyo imbetiyaanistaha mid kaagereysana dadyeysga adduunka oo u dagaallamaya gubaninimadooda, Siiba kuwa ay ka mid yihiin dhagdhagga gobaninimada doonka ee Koofurta Afrika, Angola, Musambik, Gini, Bisané, Xeebta Somaliyeed iwm.

Iminkanna garaac waxa soo socda adoo dhexda ku garaacaya sadar waliba

Sida kan oo kale:-



Qado soo dhoween ah

oo loogu tala galay
Martidii ka timid Jamburiyadda Carabta
laguna gabtay

Hudheelka Jubba, Muqdisho

bishii Febraayo 30 kii, 1972

7dii galabnimo

Marag Khudradeed

Bariis dallacan oo lagu daray diqir cagaaran iyo hilib

Hilib idaad oo solar


oo lagu
daray
baradha Shiilan

iyo
salar

Khudrad Somali

ama
Caano

Garaac meeriskan soo socda ee Syniska ah:



SOCODKA DHULKA

WEYDIIN: Dhulka ma socdaa mise kalkiisuu had iyo goor taagan yahay?

JAWAAB: Dhulku wuu socdaa.

ISKU WAREEGAYSI

Gofka aan agoonta waxba ka wadmi wuu moodaa in qorraxdu ay ku wareegaysato dhulka markuu arko qorraxdoo Buri ka soo baxaysa aroor walba! Galbadna ka dhacaysa galab walba. Runtuse waxa weeye in aanay qorraxdu dhulka ku wareegaysan.

Qorrax soo baxa iyo qorraxdhuur iyo isdabajooqaa habeenka iyo maalintu waxa ay ka dhacaaan dhulka wareegaysan. Taasi waxa ay aad kuugu muuqanaysaa. Aaddii aad samayso jitaabinta soo socda.

JITAABIN

Waxa aad soo qaadataa Kubbadda lugta iyo bitijoor, dabecdnq gol madawka gol. Kubbadda dul saar miis, faraha gacantaada bidixna xagga sare ka saar.

Awaamir: Wixii aan hagaagsanayn ha garaacin markaad zafiiska ka shaqaynayno.
Xaashidan hoos ku qorani waxay ku socotaa magac qaldan. Magacaasi
ma aha mid jira. Adigu waa inaad raadisaan magaca xubinta ee saxiix.
Magaca xubintu waxa uu yahay Instituutka Maamulka Hawlaha Guud.
Hadda, adoo hagaajina meelaha qaldan, garaac xaashidan.

Mugdisho, 1973

Ka Timid:- Wasaaradda Hawlaha Guud

Lambarka Bawfokulka:- WHG/PS/2/73/173

Jawaabta galka Lombookaa ~~WHG/PS/2/73/173~~ SIPA/102
3/2/1973

makinnadda

Ujeedo:- Tababarka Taagibka

Ku socotaa:- Dugsiga Tababarka
Istagaalaha Dowlada,
Mugdisho.

Waxaan idin soo dirnay
Jalle Mukhtar Cabduraxman Moxamed
Jannagoo codsanayna in loo
ogsalado innu ka gayb qaste
tababarka taagibka i dugsigii
makinnadd ee

Waxaan idin celinaynaa
mahad isla shugeenta ay mar Rasta
na siyo dugsiga tababarka
istagaalaha i dowlada

Muamulaha Laanta Xisbiyada
(Jalle Cali Moxamed Xasan)

Si hufan u garaac waxa soo socda:

Yaallo - Xiddiga Octoor - 8di Febraayo 1913

Horumarinta Beeruhu waxa laftahabartay
dhagralaha.

Talkabooyin xoog leh ayaa Kacaankeenu ka gaaday xagga horumarinta beeraha. Intii ka horneysay kacaankeena, sida la wada ogsoon yahay waxa dhulkeenna ka soo bixi jirey ma deegi jirin dadkeenna, hase yeeshee, maanta waxaa rumowday in uu dhulkeenu hodon yahay

Maxay saa ku noqotay? Waagii hore, marka uga horneysay, siyaasadda gumaysiga cusubi waxay lid ku tahay in dadkeenu isku fillaado, amase laga beero dhammaan waxa dadku u baahan yahay oo uu maalin walba masrufto.

Mar labaadka, dadka beeralayda waxay ahaan jireen kuwii dhibaataynta gumaysiga u babsaday oo waxay ku sugnaan jireen cadaadis iyo kodeshka badday. Marka, sidaa daraaddeed, na ayne haysan wax ku geesinnimo geliga inay dhulka u fashaan sii hagaragsan oo waxtar u leh dadweynaha.

MEERIS 12

Koox Tiro

Markaad tiro garaacayso waa inaad mid walba ku garaacdaa meesha ku habbon.

kow	1
toban	10
boqol	100
kun	1,000
toban kun	10,000
boqol kun	100,000
malyuun	1,000,000

Waligaa tirada ha u garaacin sidan oo kale.

Sidee baad hagaag isugu geyn karaysaa?


$$\begin{array}{r}
 10 \\
 456 \\
 8 \\
 + \quad 15 \\
 \hline
 478
 \end{array}$$

Kooxuhu waa inay isle'ekaadaan meeshii suuraggal u ah. Koryaaladu waa inay dhexda kaga qormaan kooxdii kasta.

Macallinkaagaa ku tusaaya sidaad u qorsheyn lahayd si aad u garaacdo bogagga soo socda.

Waxaad u baahan doontaa laabis iyo warqaad aad wax ku xisaabsato.

TUSAALE



**** Garnaac waxa soo socda, oo kuna dar magacyada tobanka degmo ee dhawaar
la sameyey haddi aad hubto.

Hadday makiinaddadu tahay ta WEYN, hareeraha waxaad ku xirtaa:

14 (18 bannaan) ↓ (18 bannaan) ↓ (72 bannaan) (18 bannaan) ↓ 7

Hadday makiinaddadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xirtaa:

16 (18 bannaan) ↓ (18 bannaan) ↓ (72 bannaan) (18 bannaan) ↓ 38

SONALIYA: Gobollo iyo Degmooyin

<u>Degmo</u>	<u>Gobol</u>	<u>Degmo</u>	<u>Gobol</u>
Cadale	Shabelaha Sare	Adan Yabal	Shabelaha Sare
Afgoye	Shabelaha Hoose	Afmadow	Jubbada Hoose
Calula	Bosaso	Baydhaba	Jubbada Sare
Balcad	Shabelaha Sare	Bardhera	Jubbada Sare
Belet Weyne	Hiran	Bender Bayla	Bosaso
Berbera	Woqooyi-galbeed	Buhodle	Burco
Borame	Woqooyi-galbeed	Barawe	Shabelaha Hoose
Bosaso	Bosaso	Dulo Barde	Hiran
Burco	Woqooyi-bari	Bur Hakaba	Jubbada Sare
Qandala	Bosaso	Kismayo	Jubbada Hoose
Dinsor	Jubbada Sare	Dhusa Marreb	Mudug
Cel Bur	Mudug	Cel Dher	Mudug
Ail	Nugal	Cerigabo	Woqooyi-bari
Galkacyo	Mudug	Jamame	Jubbada Hoose
Garadag	Woqooyi-galbeed	Qar'ho	Bosaso
Garowe	Nugal	Jilib	Jubbada Hoose
Jirriban	Mudug	Qoryoley	Shabelaha Hoose
Hargeysa	Woqooyi-galbeed	Xudur	Jubbada Sare
Las Canod	Nugal	Lug Ganane	Jubbada Sare
Las Qorey	Woqooyi-bari	Marka	Shabelaha Hoose
Hobbyo	Mudug	Odweyne	Woqooyi-bari
Wenle Weyne	Shabelaha Hoose	Seylac	Woqooyi-galbeed

Hadley makiinaddadu tahay ta WBYN, hareeraha waxaa ku xidhaa:
 6 (72 bannaan) 78
 (<.....(24 bannaan).....> <.....(24 bannaan).....> <.....(24 bannaan).....>)

Hadley makiinaddadu tahay ta YAR, hareeraha waxaad ku xirtaa:
 16 (72 bannaan) 88
 (<.....(24 bannaan).....> <.....(24 bannaan).....> <.....(24 bannaan).....>)

Taxidda Wasaaradaha, Xoghayeyaasha Dawladda iyo
Maamulayaasha Guud iyo magacyada hadda madaxda

<u>Wasaaradaha</u>	<u>Xoghayeyaasha</u>	<u>Maamulayaasha Guud</u>
Wasaaradda Gaashaandhigga	Gaashaanle Guuto Maxamed Cali Samatar	-
Wasaaradda Gudaha	Gaashaanle Guuto Xusein Kulmiye Afrax	Jaalle Axmed J. Cabdilloh
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta	Gaashaanle Cabdirasaq M. Abukar	Jaalle Maxamed Xasan (ku meel gaar)
Wasaaradda Lacagta	Dr. Maxamed Yusuf Weyrax	Dr. Maxamed M. Nur
Wasaaradda Arrimaha Dibedda	Jaalle Cumar Carte Qalib	Dr. Cabduraxman Jamac Barre
Wasaaradda Wararka iyo Hanuuninta Daweynaha	Gaashaanle Sare Ismacil Cali Abokor	Jaalle Yusuf O. El-Ashari
Wasaaradda Xoolaha, dhirta iyo daaqa	Dr. Sacid Xaji Ibrahim	Dr. Xusein X. Bod
Wasaaradda Macdanta iyo biyaha	Jaalle Maxamed Burale	Jaalle Maxamed X. Xusein
Wasaaradda Warshadaha	Dr. Ibrahim M. Samatar	Jaalle Maxamud C. Salwe
Wasaaradda Ganaosiga	Dr. Masamed Warsame "Kimico"	Jaalle Cabduraxman M. Salax
Wasaaradda Qorshaha iyo Iskuduwidda	Jaalle Axmed Maxamud Maxamed	Jaalle Jamac Rabileh God
Wasaaradda Hawlaha Guud	Gaashaanle Sare Maxamed Shekh Cosman	Jaalle Shekh Cabdi Abikar
Wasaaradda Beeraha	Dr. Cabduraxman Maxamed Xasan	Dr. Cabduraxman C. Camir
Wasaaradda Gaadiidka	Dr. Cabdulcasiis Nur Xersi	Jaalle Maxamed Salah Xaji
Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta	Gaashaanle Dexe Axmed Maxamud Farax	Jaalle Maxamed C. Cabdille
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta	prof. Shekh Cabdulqani Axmed	Jaalle Cabdullahi Cabdiraxman
Wasaaradda Shaqada iyo Cayaaraha	Gaashaanle Dexe Muse Rabile God	prof. Maxamud Xasan
Wasaaradda Caafimaadka	Dr. Maxamed Aden	Jaalle Cosman A. Xasan

Garaac waxa soo socda, oo Macallinkaaga weydii meelaha aad garan weydo.

Dhaqdhaqaaqa Maranka Somaliga

	<u>Muzdisho</u>	<u>Marka</u>	<u>Kismayo</u>	<u>Bebera</u>	<u>Wadot</u>
<u>1966</u>					
Disembar	19	4	9	18	50
			1		
<u>1967</u>					
Jannayo	25	5	10	21	61
Febraayo	18	2	8	15	43
Marso	19	6	7	14	66
Abril	29	6	10	18	63
Mey	21	2	8	19	50
Jun	10	2	5	21	38
Julay	9	1	4	19	33
Agosto	13	1	4	16	34

1

Garaac waxa soo socda. Macallinkaaga weydii meelaha aad garan weydo.

Natiijadda Imtixaanka

<u>Magac</u>	<u>Afka</u>	<u>Fartaqanban</u>	<u>Garaacista</u> <u>Maakiinadda</u>	<u>Wadac</u>
Adan Habi Maxamed	80	70	65	135
Maxamed Habi Farah	80	82	30	112
Ibrahim Xasan Adard	75	65	40	105
Maxamed Xasin Axmed	72	52	50	102
Adan Dahir Habi	70	50	48	98
Yersi Gabi Jamac	60	45	42	87
Xusen Musa Shire	48	52	30	82
Abdulqadir Maxamed Cali	50	45	30	75
Abdullahi Cali Guled	40	34	28	62
Sahra Hinda Jamac	40	52	10	62
Nurta Yersi Ismail	30	24	34	58
Khadija Jibriil Salax	20	15	20	35



Xorshaha nool ee Somaliga u dinto Jamhuuriyadda
Carabta Masar

	1964		1965	
	Lambar	Qiimaha Shilinka Somaliga	Lambar	Qiimaha Shilinka Somaliga
Gasta	1,116	688,000	7,434	4,555,000
Lo'da	41,780	14,542,000	22,916	9,240,000
Idaha	41,512	3,317,000	2,538	217,000
Kiyaha	2,741	155,000	310	16,000
JAMDAK	—	19,002,000	—	14,028,000

Qayb: (Ha ku cara widaa)

$$\frac{19,002,000}{(1+110)+1}$$

$$12 + 12 + 12 + 12 + 12 = 60$$

Garaac kooxahan iyo weeroyinkan soo socda:

ISKAA WAX U QABSO

<u>GUBOLKA</u>	<u>TIRADA</u> <u>MASHRUUCA</u>	<u>LACAGTA</u>
Muqdisho	50	3,123,757.22
Juublanda H.	56	1,591,505.35
Buuro	63	1,235,019.45
Hiran	25	948,000.00
Benadir	87	820,754.75
Juublanda S.	61	807,820.35
Mudug	43	646,287.65
Bosaso	58	530,427.00
Hargeysa	24	225,507.00
	<u>467</u>	<u>9,930,078.77</u>

Dhawrkii bilood ee uu socday
 ololihii lagu dar yeelayey hantiwadaagga
 ciilmiga ku dhisan 1972kii, lacag toban
 milyan oo shilin ah iyo xoogga shicibka
 Soomaaliyeed waxay gabyo tiraan
 467 mashruuc oo ISKAA WAX U QABSO ah.
 Sida Wasaaradda Wararka iyo Hanuunta
 Dadweynaha sheegtay, mashaariicdaasi waxay
 laga hirgeliyey magaalamadaxdeena iyo
 gobollada kala geddisan ee dalkeenna.
 (Xiddigta October, Isniin 29kii Janayo 1973)

MEERIS 13

Istensal Goyn

(Ama sida aad u badin lahayd xaashi war-ogaysiin ah ama war-bixinah)

Sabab

Haddi lagaa cudsado inaad xaashi ka sameyso 6 naqil, sahal ayaad u sameyn kartaa adoo isticmaalaya shan warqadood oo kaarboon ah, shan warqadood oo khafiif ah iyo warqadda xafiiska magaciisu ku yaalo oo aad u kormariso. Laakiin bal ka dig iyadoo lagu weydiisday inaad boqol naqil ka sameyso war-ogaysiin dawladda oo ku saabsan shaqada xubinta aad u shaqayso. Ama se ka soo qaad adoo ka shaqeeya xafiiska Madaxtooyada Guddiga Golaha Sare ee Kacaanka oo lagugu amray inaad xaashi war-ogaysiin ah u dirto wasaaradaha iyo wakaaladaha madaxa-bannaan.

Dariiqada
Istensalka
loo gooyo

Dariiqa hagaagsan ee loo garaaco war ogaysiintu waxay tahay in marka hore warqad lagu garaaco diyaarin laba bannaan loo dhexaysiiyo, dabadeed loo geeyo sarkaalka xaashida saxeexaaya si uu uga beddelo wixii uu dooneyo. Dabadeed xaashida waxa aad ku garaacdaa warqada istensalka ee xaydha leh. Furaha khadka ee makiinadda u beddal caddaan si ay makiinaddu ugu gooyso xuruufta istensalka guudkiisa. Sidii caadiga ahayd waa inaad ka gaabisaa si xoogganna u garaacdaa furayaasha si aad istensalka u gooyso. Haddii aad gef sameyso waxa aad korka ka marineysaa khadka cas (guduudan) ee loogu talagalay, sugna intay qalalayso si diir u sameysmo. Dabadeed meeshii ku dul garaac eraygii saxa ahaa. Markaad xaashida dhameyso madaxdaadu waxay magaca ku saxeexi karaan istensalka korkiisa iyagoo isticmaalaya qalinka birta ah ee gaarka u ah.

Si fiican u hubi waxaad garaacday in uu gef leeyahay. Maskaxda ku hay in ay boqol qof akhriyi doonaan xaashida.

Istensal
badin

Dabadeed istensalka waxa aad u gudbinaysaa qofka ku shaqa leh istensal badinta. Ama adaa ba baran kara sida loo badiyo istensalka. Istensalka hogagiisa waxa aad ku hagaajinaysaa biraha soo tagan ee makiinadda istensal badinta, intiisa kalena waxay ku dul dhagaysaa wareegatada khadka leh. Wareegatada markay wareegto, khadka ayaa hoos ka soo gelaya meelihii daldaloolay oo ku daabacmaha warqadihii loogu talagalay.

JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Barnaamijka Horumarinta ee Qarammada Midoobey
INSTITUUTKA MAAMULKA HAWLAHA GUUD

<u>Dnlka</u>	: SOMALI
<u>Xeerka Mashruuca</u>	: SOM. 15
<u>Wakaalada Taliska</u>	: QARAMMADA MIDOOBEEY
<u>Wakaalada Wargelinta la Wadaagta</u>	: XAFIISKA MADAXTOOYADA GUDIGGA SARE EE KACAANKA
<u>Taariikh shaqada mashruuca la saxeexay</u>	: 1dii Sebtembar 1970
<u>Lambarka iyo taariikhda saxeexyada ee tusaalaynta iyo talobiiriska</u>	: waxba
<u>Taariikhdii shaqadu bilaabatay</u>	: 1dii Abril 1970
<u>Taariikhdii mashruuca rasmi ahaan loo dhagan geliyey</u>	: 29kii Sebtembar 1970
<u>Taariikhdii dhammaadka hawsha loogu talagalay</u>	: 31ka Disembar 1973
<u>Muddada wargelinta</u>	: 1d Abril/30ka Sebtembar 1972

Garaac waxa kor ku yaal

Ogow: Waxa kale oo loo baahan yahay naqilo Af Ingirisi ah oo Qarammada Midoobey loo diro. Waxaana garaaca
Karraniyaasha xafiiska Qarammada Midoobey ee Muqdisho.
Afafka rasmi ahaan loogaga shaqeeyo Qarammada Midoobey
waxay yihiin Ingirisi, Faransis, Ruush iyo Isbanish.

Laylin

Macallinkaagaa ayaan bilaabi doona marka aad diyaar u tahay laylinta.

Markaad garaacdo 10 daqiiqadood, ee aad sameyso 10 gef iyo in ka yar waad ku gudubtay sugnaantii.

Markaad layligan sugnaanta ku gudubto, dabadeed 7 malmood la mar gooni ahaan malmaha Khamisaha, macallinkaagaa saacad waqtika kuugu qiyaasi doona markaad garaacayso layliyada soo socda.

Haddi 10kii daqiiqo aad garaacdo 25 eray, laakiin aad sameyso 10 gef, 10ka ayaan laga goynayaa 25, dabadeed waxa kuu soo hadhaya 15 eray oo keli ah.

U GARAAC SI DEGGAN OO SUGNAAN LEH. DHEERAYNTU MAXAY IMIN DOONTAA HADHOW.

MAR KASTA XAQAA GUULEYSTA

Dawlad-ku-shoogga Koofurta Afrika oo ku caan noqotey	57
midabtakoorka iyo cunaqabataynta dhaqdhaqaaqa gobannimo	112
doonka ee dalka Afrika, iyo qawlaysatada Rodesiya oo u horra	171
ka yahay "Yan Smit" waxay isku dayayeen beryahakanba inay	228
haroerooyaan oo cadaadiyaan dalka Sambiya iyagoo ku	279
marmarsiyoonaya in dalka Sambiya dagaalyahannada gobannimo	337
doonka ay ku soo hoydaan oo ay xarun u tahay. Waxay marka	396
ugu horroya isku dayeen inay dadka Sambiya iyo madaxdooda ay	456
bajiyaan oo xuduudka ay Sambiya la leeyihiin ay soo dhideen	515
askar tiro badan iyo hub lixaad leh, sidaasna waxay ku	569
xejiyeen inay xiraan soohdinta oo aan waxba ugu gudbin	623
Sambiya waxana ugu togin. Ulajeeddada ay tallaabadaa ka	680
leeyihiin waxay tahay in ay dalka Sambiya ka gooyaan	732
adduunka kale, ciriirna ka geliyaan xagga dhaqaalaha isla	789
markaasna ay cirib tiraan geesiyada Afrika oo u dagaallamaya	849
gobannimadooda.	864
Dadweynaha afrikaanka ah oo deggan-Koofurta Afrika iyo	923
Rodisiya waa ay garteen-gardarrada foosha xun iyo kadeedka	981
ay la rabaan dadka Afrika dawlado ku sheeggasi, oo habeen	1038
iyo maalin waxay u dagaallama hayaan siday ku holi lahaayeen	1098
xuquqdooda iyo gobannimadooda ugana hor tegi lahaayeen	1153
midab takoorka iyo ujeeddoyinka kale ee gumeysiga.	1204
Waxaa kaloo ka yaab leh oo ragganimo ah sida dadweynaha	1264
iyo dawladda Sambiya ay uga hor tagtay weerarrada gardarrad	1323
ah oo ay ku soo kicinayaan dawlado ku shooggaasi. Waa	1378
waddaniimo iyo geesinnimo sida Madaxweynaha Sambiya	1431
"Kanad Kaunda" uu uga hor tegay ama uga hor tagaayo hadda	1488
dagaalka ay ku wadaan Koofurta Afrika iyo Rodesiya.	1539
Dadweynaha deggan qaaradda Afrika oo dhan iyo dadka	1595
horukaca jecel ee adduunka waa ku garab taagan yihiin dadka	1654
Sambiya iyo madaxdoodaba dagaalka ay kaga hor tagayaan	1708
qawlaysatadaas.	1723
Madaxweynahaenna Jaalle Siyad mar badan buu ku	1774
oofceliyey ineyan Afrika xor ahayn ilaa intii ay jiraan	1829
meelo la gumeysanaayo oo ay ka mid yihiin dalalkaasi.	1882

= 376

(Waxaa laga soo guuriyey Xiddigta Oktobar,
1d Febraayo 1973)

erayo

GEEDUHU SIDA AY NACABKOOKA ISKAGA

DHICIYAAN

Markaynnu nafleyda ka hadlaynay, waxa aynu sheegnay	57
sida ay nafleydu nacabkeeda ama iskagaga dhiciso, ama uga	114
dhuumato ama uga fakato. Sidaa nafleydu waxa ay u yeeshaa	173
in ay nafteeda la baxsato. Nafleyda kuwii wax ay naftooda	232
kula baxsadaan aan lahayni nacabkooda iyo darxumo ayaa	286
mariya oo way tafiigo'aan. Sida nafleydu ugu baahan tahay	345
inay nafteeda la baxsato oo ay tafiirgo'a iskaga ilaaliso	402
ayaa geeduhuna ugu baahan yihiin. Hasa yeesho, geeduhu ma	452
guurguuraan, sidaa awgeedna nacabkooda kama carari karaan.	520
Geeduhu maleh ilko iyo ciddiyo iyo waxyaalo kale oo ay	574
nacabkeeda iskaga dhiciso. Nacab-iska-dhicinta geeduhu	630
maaha inuu halkii wal oo geed ihiba isagu naftiisa la baxsan	690
karo, macnuhu waxa weeye in geedaha caynad waliba ai ka	745
baxsato tafiirgo'a. Maxay haddaba geeduhu tafiirgo'a kaga	804
baxsadaan? Waa ayo nacbka geeduhu? Badiba nacabka	857
geeduhu waa nafleyda cuntada ka dayda geedaha. Geeduhu way	917
ka tafiir badan yihiin nafleyda. Waad og tahay maseggeda,	976
iyo galleydu iyo geedaha badidoodu - inay markiiba dhalaan	1034
boqollaal ama kumanyaal iniinyood, nafleyduse markay ugu	1090
badan tahay inay markiiba dhalaan dhawr sida bisadda, iyo	1147
jiirka. Nafleyda la dhaqdaa badiba markiiba ilma keliya	1204
ayay dhashaa. Taasi waxa ay ku tusaysaa in ay geeduhu	1259
nafleyda badiba ka taran badan yihiin. Sidaa awgeed ayaa	1317
tafiirgo'a geeduhu uga adag yahay tafiirgo'a nafleyda.	1371
Taasi waxa ay muujinaysaa in aanay geeduhu u baahnayn	1424
nacab-iska-dhiciis sida ay nafleydu ugu baahan tahay.	1475
(Haddaba Tafiir-badnaantu waxa ay tahay sida ugu weyn ay	1532
geeduhu kaga baxsadaan Tafiirgo'a).	1567
Intaa waxa u raaca in geedaha qaarba leeyihiin waxay	1624
iskaga dhiciyaan nacabka nafleyda ah ee doonaaya inuu cuno.	1683
Qaar baa aad u waaweyn sida berdaha, iyo gobka iyo	1737
galoolka iyo kulanka iyo quraca iyo kuwa kale oo badan.	1791
Geedaha caynkaas ah hadba in yar ayuun bay ka cuni karaan,	1848
marna ma wada rujiin karaan oo ma'dili karaan. Geedaha	1893
caynkaa ihi xoogooda ayay naftooda kula baxsadaan.	1943

(Waxaa laga soo guuriyey Bungga Sayniska Dugsia Hoose
ay dhigeen: Guddiga Afka Somalida)

TALLAABOYINKA

NOLOSHA EE AY NAFLEYDU MARTO

Nafleydu jaadba nolosheedu tallabooyin ayay soo martaa.	60
Tallaabada ugu horraysa waa abuurqaadka. Jaad nafley ah oo waliba waa inay abuurantaa intaanay dhalan. Abuurqaadku wuxuu ka yimaadaa iniin lab iyo iniin dhaddig oo is dhexgala midna isku noqda. Mid isku noqoshadooda waxa ka dhalata iniin gudha oo taranta ilaa qof dhan ama naf dhan noqoto. Tallabada labaad waxa weeye dhalashada.	120 177 237 294 351 390
Nafleyda qaar baa dhala ilmo abuurkii u dhamaaday oo yaraan maaha ee aan si kale kaga soocnayn nafleyda waaweyn, kuwaas oo dhashooda naasnuujiya waxa ka mid ah: lo'da, geela, bisadda, dameeraha cawsha, fardaha iyo dadka. Qaarna ukun bay dhalaan. Ukuntaasi markay dillaacdo ayaa ilmuhu ka soo dhex baxaa. Kuwaana waxa ka mid ah shinbiraha, yaxaaska, diirta, maska iyo kuwa kale. Si ap ukuntu u dillaacdo waa inay hooyadeed ku fariistaa ukunta ama ay ciid ku aastaa. Labadaa siyoodba waxay keenaan diirrimaad aan looga maarmayn dillaaca ukunta.	447 501 561 613 671 721 779 837 892 938
Badiba shinbiruhu ukuntooda kuma ay fariistan lakiin aqalkay ku dedaan, nafleyda kalee ukunta dhashaase badiba ukunteeda way aastaa. Waxa jira nafley kale oo ukun dhasha, laakiin ukunta marka horaba aanay ka dillaacin ilmo u eg kii dhalay. Ukuntu markay dillaacdo waxa ka soo dhex baxa ilmo ka arag geddisan. Ilmahaasaa araggiisu taallabo taallabo u beddelmaa ilaa uu u ekaado kii dhalay, nafleyda caynkaas ah waxa ka mid ah cayayaanka, iyo raha. Markay ukunta rahu dillaacdo waxa ka soo baxa miraxareeraad. Miraxareeraadkaasaa dharaaro dabadoed isu boddela rah.	995 1052 1105 1164 1223 1282 1340 1397 1450 1504
Balanbaalista haddaynu eegno waxaynu arkaynaa ukuntay dhashaa markay dillaacdo in marka hore ka soo baxdo wax dirxi ama diir oo kale ah, waxay muddo dabadeedna isu rogtaa balanbaalis baalal leh. Tilmaan kale haddaynu fiirino, kanecadu ukunteeda biyaha fadhiyay dhex dhigtaa. Ukunta waxa ka soo dhex baxa wax la yiraahdo "yuruuruc". Ilmaha "yuruuruca" ihi uma eka kanecoo, baalalna weli mala. Yuruurucinkastaanu weli kanecoo dhan ahayn haddana wuxuu u baahan yahay hawo.	1562 1617 1670 1725 1783 1839 1895 1945 1980

(Waxaa laga soo guuriyey Buugga Sayniska Dusiga Hoose ay dhigeen: Guddiga Afka Somalida)

GEEDAHA ABUURKOOKA IYO KORRIINKOOKA

Sidii aynnu ku soo sheegnay casharkii toddobaad	52
dhammaadkiisii, geedaha ubaxa bixiyaa waxay ka abuurmaan	108
iniinyo ama miro. Iniinta marka carrada lagu rido ee la	165
waraabiyo waxa ka abuurma geed. Abuuranka waxaynu	217
niraahnaa Biqil. Iniintii ayaa biqishay ayannu niraahnaa.	276
Aad ugu fiirso xabbad maseggo ama galley ama digir ah.	330
Waxaad ku arkaysaa meel diisan oo layraahdo IL. Marka	385
xabbadda lagu rido carrada ee la waraabiyo way biqishaa.	441
Maxaa dhaca markay iniintu biqisho?	476
Marka ugu horraysa, xididka weyn ayaa ka so baxa isha	534
iniinta. Xididku hoos ayuu carrada u galaa. Dabeedna	590
qaybta kale ayaa kor u soo baxda. Qaybtaasi markay carrada	650
korkeeda soo gaarto ayay caleemaha ugu horreeya ee doogada	708
ah soo bixisaa. Inta ka horraysa caleen soo ma baxdo,	762
cuntada ay iniintu ubaahan tahay waxa ku kaydsan tahay	816
iniinta qudheeda. Xididka weyni hoos buu u baxaa	866
dabadeedna wuu sii kala farcama. Inta kor u soo baxdaana	924
waxay noqotaa jirrida iyo laamaha ay caleemuhu ku yaalliin.	984
Iniintu markay biqisho geedku laba dhinac ayuu u baxaa kor	1042
iyo hoos. Xididku hoos ayuu u baxaa inta kalena kor ayay	1100
u baxdaa.	1109
Tallaabooyinka ay maro iniinta digirta ihi markay	1164
biqlayso.	1173
Sawirkaani wuxu ku tusaya in marka ay iniintu biqlayso,	1233
xididku uu u soo hor baxo uu dabeedna farraarro bixiyo.	1289
Dabadeedna geedka intiisa kore ayaa carrarada guudkeeda ka	1347
soo mura. Markuu geedku carrada madaxa kala soo muro	1401
ayay caleemaha doogada ihi ay soo baxaan. Markaasuu	1454
geedku cuntadiisa samaysan karaa. Taswiraahaa waxa kalee	1512
aad ku arkaysaa in xididku uu timo leeyahay. Timaha ayuu	1570
xididku carrada kaga soo nuugaa biyaha iyo nafaqada ku	1624
milan. Geed walba xididdadiisu way leeyihiin timahaa.	1679
Iniintu si ay u biqisho oo ay geed dhan u noqoto, waxa ay	1736
u baahantahay carro fiican oo nafaqa leh iyo biyo.	1786
Watii aynnu cashar hore ku soo sheegnay waxtarka geedaha.	1844

Qorista Afkeenna Hooyo

Intii qurao jirayba qodaxina waa jirtey. Intii	54
ummadda Somaliyed jirteyna Af Somaligu waa jiray.	193
Wuxuuna hadda ka hor ahaan jiray af aan qornayn oo uun lagu	162
hadlo. Runtiina, qofna ma oran karo, intaas oo sannadood	220
ayan afkeennu jiray oo lagu hadlayey.	257
Waxaase qofkii waxgarad ahi og yahay in afkeennu yahay	317
mid qarniyo badan soo jiray oo xididkiisa iyo jirriiddisu	374
aad u adag yihiin.	392
Culimada aad u danaysa taariikhda, afafka iyo murtida	451
Afrikaankana, waxay sheegeen oo isla wada oggol yihiin in	507
afkeennu ka mid yahay afafka waaweyn ee Afrika lagaga hadlo.	567
Inkastoo dadka ku hadlaa aanay aad u badneyn marka loo	621
fiiriyo inta ku hadasha Sawaxiliga. Kawsaha iyo kuwa kale,	681
waxay culimadaasi qireen in af Somaligu yahay mid tallaan	740
oo leh murti badan. Wuxuuna hadan ka yahay xagga gabayada,	800
geeraarada, guurawga, jiiftada, buraanburka heesaha	851
maahmaahyada, sheekooyinka iyo murti kale oo jaadad badan	908
ah. Waxay kaloo qireen in afkeennu yahay mid waqti kasta	960
la socon kara oo kordhaya oo seben kasta ay ku biirayaan	1022
erayo cusub oo ku saabsan ilbaxnimada iyo aqoonta guud.	1077
Afka caynkaas lagu tilmaamay, wasii hore waxa dhisi	1135
jiray oo xoogayn jiray abwaannada iyo gabyanga somaliyed oo	1194
u yeelay jirrida adag uu ku taagan yahay iyo murtida badan	1253
ee kala jaadka ah ee aad loo jecel yahay. Da'da maanta	1309
joojtana, gaar ahaan dhallinyarada taaliinta sare leh ee	1365
jaamicaadka ka soo baxay, wuxuu ka sugayaa in ay ku dejiyaan	1425
aqoonta cusub iyo cilmiga sayninska. Haddii aanay sidaas	1483
yeelinna, hawsha geestoodii way ka soo bixi kari waayeen oo	1542
afkoodii hooyo way gabeen.	1563
Kuwa ay u suurageli weyday waxa ka mid ah dalal lagaga	1628
hadlo ugu yaraan labatan ilaa soddon af, oo kii kastaaba u	1687
sii kala baxo lahdado aan tiradooda la koobi karin. Nasiib	1747
wanaaggeennase, waxa ina wada kulmiya oo innaga dhexeeya af	1806
qura oo guud ahaan Somali oo dhani isku wada afgaran karto.	1865
Kan sidaas ah ayaa maanta ka hor marna dadkiisii arkin	1919
isagoo qoran.	1932